Isku keenista qoyska ee dadka la siiyey ilaalinta

Familienzusammenführung für Schutzberechtigte (Asyl- und subsidiärer Schutz)

WARBIXIN MACLUUMAAD AH OO AF-SOOMAALI AH

Xaaladda: 07.08.2026

Isku keenista qoysku (Familienzusammenführung) waxay u suurtagelisaa xubnaha qoyska ee dhow ee dadka haysta ilaalin caalami ah (**magangelyo – Asyl – ama ilaalinta kaabista ah – subsidiärer Schutz**) inay yimaadaan Awstariya oo ay mar kale qoys ahaan u wada noolaadaan.

Iyada oo qayb ka ah hirgelinta dib-u-habaynta Nidaamka Magangelyada ee Guud ee Midowga Yurub **(GEAS-Reform)** (wax-ka-beddelka xeerarka Midowga Yurub ee khuseeya magangelyada iyo socdaalka), ayaa sidoo kale Awstariya dib u habayn ku samaysay xeerarka ku saabsan isku keenista qoysaska dadka la siiyey ilaalinta.

Warqaddan macluumaadka waxaa loogu talagalay dadka haysta xaaladda ilaalinta caalamiga ah ee Awstariya iyo xubnaha qoyskooda. Waxay sharraxaysaa cidda iman karta Awstariya, muddada kama dambaysta ah iyo shuruudaha khuseeya, sida habraacu u socdo iyo meelaha laga heli karo talo iyo taageero.

Warqaddan macluumaadka ma khusayso dhammaan xaaladaha. Tusaale ahaan, xeerar kale ayaa khuseeya dadka haysta kaarka degganaanshaha ee Rot-Weiß-Rot-Karte plus ama guurrada la galay kaddib markii la aqoonsaday xaaladda ilaalinta. Xaaladahaas halkan laguma sharraxayo.

Ogeysiis: Warqaddan macluumaadka ahi ma beddelayso la-talin sharci oo qofka si gaar ah loogu sameeyo.

Kiis kastaa wuu ka duwan yahay kiisaska kale. Sida ugu dhakhsaha badan ee suurtogalka ah kaddib marka lagu siiyo xaaladda ilaalinta, la xiriir xarun bixisa la-talin, tusaale ahaan Laanqayrta Cas ee Awstariya (Österreichischen Roten Kreuz). Xogta lagala xiriirayo waxaad ka heli doontaa bogga ugu dambeeya.

Digniin: Qaar ka mid ah xeerarka weli si buuxda looma caddayn, wayna isbeddeli karaan. **Xarunta la-talinta ayaa ku wargelin karta xaaladda sharci ee hadda jirta.**

Yaa xaq u leh inuu qoyskiisa keeno?

Xeerarka khuseeya waxay ku xiran yihiin nooca xaaladda ilaalinta ee uu haysto qofka ku nool Awstariya, kaas oo xubnaha qoyskiisu doonayaan inay ugu soo biiraan.

Dadka loo aqoonsaday inay xaq u leeyihiin magangelyo (Asyl) waxay xubnaha qoyskooda ugu dhow keeni karaan Awstariya isla marka habraaca codsiga magangelyadu si wanaagsan u dhammaado. Codsiga isku keenista qoyska waa in la gudbiyaa **saddex bilood gudahood laga bilaabo taariikhda la aqoonsaday xaaladda magangelyada.** Qofkii dhaafa muddadan kama dambaysta ah waa inuu buuxiyaa shuruudaha guud ee lagu bixiyo oggolaanshaha degganaanshaha: dakhli ku filan, caymis caafimaad iyo hoy ku habboon heerka caadiga ah ee deegaanka.

Dadka haysta ilaalinta kaabista ah (subsidiärer Schutz) waxay qoyskooda keeni karaan oo keliya marka ay ka soo wareegto **laba sano laga bilaabo taariikhda la siiyey xaaladda ilaalinta**. Si kastaba ha ahaatee, waa inay buuxiyaan shuruudaha guud ee lagu bixiyo oggolaanshaha degganaanshaha.

Nidaamka qoondada (Quotenregelung)

Tan iyo markii dib loo habeeyey xeerarka isku keenista qoyska, waxaa jira **qoondo sannadle ah** oo loogu talagalay isku keenista qoysaska. Qoondadani waxay go'aamisaa tirada boosaska uu gobol kasta oo federaal ah sannad kasta u qoondeynayo xubnaha qoyska ee dadka la siiyey ilaalinta. Haddii dhammaan boosaskii qoondada ee gobol federaal ah la buuxiyo, go'aanka codsiga guud ahaan dib ayaa loogu dhigayaa sannadka xiga.

Ugu dambayn saddex sano kaddib marka codsiga la gudbiyo, waa in la bixiyaa oggolaanshaha degganaanshaha xitaa haddii aysan jirin boos qoondo oo bannaan, haddii dhammaan shuruudaha kale la buuxiyey.

Yaa ka tirsan qoyska?

Sharcigu qoys ahaan wuxuu u aqoonsan yahay oo keliya waxa loo yaqaan **qoyska asaasiga** ah (Kernfamilie). Waxaa ka mid ah:

- Xaaska/ninka ama lammaanaha si sharci ah loo diiwaangeliyey
- Carruurta aan qaangaarin ee aan guursan (oo ay ku jiraan carruurta la korsaday iyo carruurta uu lammaanuhu hore u dhalay)
- Waalidiinta dadka aan qaangaarin ee la siiyey ilaalinta

Kuma jiraan:

- Carruurta qaangaarka ah
- Walaalaha qaangaarka ah
- Ehelka kale

Shuruudaha khuseeya lammaanaha is qaba:

- Guurku waa inuu jiray ka hor inta uusan qofka tixraaca ah (Bezugsperson) soo gelin Awstariya.
- Labada qof ee is qaba waa inay ahaadaan ugu yaraan 21 jir marka codsiga la gudbinayo.

asylkoordination österreich
Burggasse 81/7, 1070 Wien
Weitere Infoblätter auf www.asyl.at

Waa maxay shuruudaha kale ee khuseeya?

Xubnaha qoyska ee dadka xaqa u leh magangelyada (Asyl) waa inay buuxiyaan shuruudahan dheeraadka ah haddii codsiga la gudbiyo in ka badan saddex bilood kaddib marka la aqoonsaday xaaladda magangelyada. Xubnaha qoyska ee dadka haysta ilaalinta kaabista ah (subsidiärer Schutz) waa inay mar walba buuxiyaan shuruudahan.

Shuruudaha waa kuwan:

- **Dakhli ku filan:** Qofka doonaya inuu qoyskiisa keeno waa inuusan qaadan kaalmada bulshada (Sozialhilfe) ama kaalmada dakhliga ugu yar (Mindestsicherung), waana inuu leeyahay dakhli joogto ah. Qaddarka dakhliga ugu yar ee loo baahan yahay wuxuu ku xiran yahay tirada xubnaha qoyska iyo inta kirada gurigu tahay.

  Lammaanaha is qaba waxaa hadda (2026) looga baahan yahay dakhli saafi ah oo dhan 2.064,12 Yuuro; ilmo kasta oo dheeraad ahna waxaa lagu daraa 201,88 Yuuro. Sidoo kale waxaa la tixgeliyaa kharashka guriga iyo kharashaadka kale ee joogtada ah. Qaddar dhan 386,43 Yuuro (oo loo yaqaan lacagta ka reeban xisaabinta, Freie Station) laguma daro xisaabinta. Qaddarka dakhliga ugu yar sannad kasta ayaa dib loo waafajiyaa.

- **Caymiska caafimaadka (Krankenversicherung):** Xubnaha qoyska ee imanaya waa inay helaan caymis caafimaad oo ku filan, inta badan iyaga oo lagu darayo caymiska caafimaadka (Mitversicherung) ee qofka ay ugu soo biirayaan.

- **Hoy ku habboon heerka caadiga ah ee deegaanka:** Gurigu waa inuu ku filnaadaa tirada xubnaha qoyska. Waxa loo arko guri ku filan waxay ku xiran tahay baaxadda guryaha ay dadka kale ee ku nool agagaarka deegaankaasi caadi ahaan deggen yihiin.

Sidee ayuu habraaca codsigu u socdaa?

1. La-talin

Sida ugu dhakhsaha badan ee suurtogalka ah ballan la-talin ah ka qabso Laanqayrta Cas ee Awstariya (Österreichisches Rotes Kreuz). Halkaas waxaad taageero iyo macluumaad ka heli doontaa su'aalaha la xiriira habraaca codsiga iyo diyaarinta codsiga.

2. Codsiga safaaradda

Codsiga waa in dibadda Awstariya lagu gudbiyaa safaaradda Awstariya ee u xilsaaran. Safaaradda ay tahay in codsiga loo gudbiyo waxay ku xiran tahay meesha ay deggen yihiin dadka codsanaya. Waxaad arrintan ka hubin kartaa bogga internetka ee Wasaaradda Federaalka ee Arrimaha Yurub iyo Caalamiga ah (Bundesministerium für europäische und internationale Angelegenheiten, BMEIA – „Außenministerium“).

Si loo ilaaliyo muddada saddexda bilood ah, waxaa ku filan in codsiga qoraal ahaan la gudbiyo. Inta badan Laanqayrta Cas ayaa tallaabadan fulisa haddii loo igmaday inay qofka ku matasho

habraacan. Kaddib safaaraddu waxay ballan u qabataa xubnaha qoyska si ay shakhsi ahaan u yimaadaan.

Ballantaas safaaraddu waxay la wareegaysaa codsiga, waxayna u gudbinaysaa Hay'adda Federaalka ee Arrimaha Ajaanibta iyo Magangelyada (Bundesamt für Fremdenwesen und Asyl, BFA).

3. Baaritaanka ay samayso Hay'adda Federaalka ee Arrimaha Ajaanibta iyo Magangelyada (BFA)

Hay'adda Federaalka ee Arrimaha Ajaanibta iyo Magangelyada (BFA) waxay hubinaysaa in xiriirka qoys ahaaneed uu dhab ahaantii jiro iyo in dhammaan shuruudaha sharciga ah la buuxiyey. Arrintan awgeed waxaa suurtagal ah in su'aalo la weydiiyo qofka ay xubnaha qoysku ugu soo biirayaan ee jooga Awstariya iyo sidoo kale xubnaha qoyska ee dibadda jooga.

4. Go'aanka

Haddii dhammaan shuruudaha la buuxiyo, safaaradda Awstariya waxay soo saartaa fiisaha D (Visum D), kaas oo qofka u oggolaanaya inuu Awstariya soo galo. Habraaca codsigu wuxuu qaadan karaa dhowr bilood.

5. Marka la soo galo Awstariya

Marka ay Awstariya soo galaan kaddib, xubnaha qoyska waxay Hay'adda Federaalka ee Arrimaha Ajaanibta iyo Magangelyada (BFA) ka helayaan kaarka „**Rot-Weiß-Rot – Karte plus**“ (RWR+). Oggolaanshahan degganaanshaha wuxuu u oggolaanayaa inay Awstariya ku noolaadaan oo ka shaqeeyaan, balse xaq uma laha inay qaataan kaalmada bulshada (Sozialhilfe). Marka ay Awstariya yimaadaan kaddib, waa inay gutaan waajibaadka la xiriira isdhexgalka bulshada, gaar ahaan inay laba sano gudahood ku gaaraan heerka A2 ee aqoonta luqadda Jarmalka. Xubnaha qoyska sidoo kale waxay xaq u leeyihiin inay gudbiyaan codsi ku saabsan ilaalin caalami ah (magangelyo).

Muddada kama dambaysta ah ee muhiimka ah inta lagu jiro habraaca codsiga

Muddada soo socota waa in si khasab ah loo ilaaliyaa:

- In la yimaado ballanta safaaradda.
- In fiisaha D (Visum D) la codsado **3 bilood** gudahood kaddib marka la gaaro go'aan wanaagsan oo ku saabsan isku keenista qoyska.
- In oggolaanshaha degganaanshaha (RWR+) laga soo qaato Hay'adda Federaalka ee Arrimaha Ajaanibta iyo Magangelyada (BFA) muddo **6 bilood** gudahood ah.

Haddii aan la ilaalin muddadaas, waxaa dhici karta in habraaca codsiga la joojiyo.

Waa maxay dukumentiyada loo baahan yahay?

Xubnaha qoyska waxay si gaar ah ugu baahan yihiin dukumentiyadan:

- Foomka codsiga
- Baasaboorka safarka
- Shahaadada dhalashada
- Laba sawir oo cabbirka baasaboorka ah
- Caddeynta xiriirka qoys ahaaneed (tusaale ahaan, shahaadada guurka)

Qofka ay xubnaha qoysku ugu soo biirayaan ee ku nool Awstariya wuxuu u baahan yahay, iyo kuwo kale, dukumentiyadan:

- Go'aanka aqoonsiga magangelyada ama go'aanka kordhinta muddada ilaalinta
- Kaarka degganaanshaha
- Caddeynta diiwaangelinta cinwaanka deggenaanshaha
- Shahaadada dhalashada

Dukumentiyada laga soo saaray dalal shisheeye guud ahaan waa in si rasmi ah loo sharciyeeyaa (beglaubigt), laguna turjumaa luqadda Jarmalka. Haddii dukumentiyo maqan yihiin, hay'adaha dowladda waxay dalban karaan caddeymo dheeraad ah, tusaale ahaan baaritaanka DNA-da (DNA-Tests).

Kharashaadka iyo lacagaha laga qaado

Dadka codsanaya ayaa iyagu iska bixinaya kharashaadka la xiriira helitaanka caddeymaha, turjumaadaha iyo sharciyeynta dukumentiyada, baaritaannada DNA-da haddii loo baahdo, iyo dhammaan kharashaadka safarka.

Codsiga waxaa hadda laga qaadayaa 218 Yuuro qofkiiba.

Fiisaha lagu soo gelayo Awstariya wuxuu ku kacayaa: 195 Yuuro qof kasta oo jira lix sano ama ka weyn. 97 Yuuro carruurta ka yar lix sano.

Ogeysiisyo gaar ah

Guurrada dhaqanka: Guurrada lagu galay hab dhaqameed ama hab diimeed mar walba lama aqoonsana.
Guurro badan: Waxaa suurtagal ah in hal xaas ama hal nin oo keliya uu qofka ugu soo biiro Awstariya.
Carruurta: Guud ahaan, carruurtu waa inay ahaadaan kuwo aan qaangaarin marka codsiga la gudbinayo. Haddii ay qaangaar noqdaan inta habraaca codsigu socdo, xaqa ay u leeyihiin isku keenista qoyska wuu sii jirayaa.
Carruurta qaxootiga ah ee aan cidina la socon: Iyaga waxaa khuseeya xeerar gaar ah. Waalidiinta carruurta aan qaangaarin ee loo aqoonsaday inay xaq u leeyihiin magangelyo (Asyl) guud ahaan waxay isla markiiba gudbin karaan codsi. Carruurta haysta ilaalinta hoosaadka (subsidiärer Schutz) waxaa khuseeya muddo sugitaan ah oo laba sano ah. Shuruudo gaar ah marka la

buuxiyo, dadka loo aqoonsaday inay xaq u leeyihiin magangelyo waxay sidoo kale waalidkood keeni karaan Awstariya, xitaa haddii ay qaangaar noqdeen intii uu socday habraaca codsigooda magangelyada. Arrintan waxaa si gaar ah muhiim ugu ah in la helo la-talin sharci oo aqoon leh.

Yaa caawin kara haddii su'aalo jiraan?

Isku keenista qoyska waa arrin sharci ahaan adag, waxaana muhiim ah in la ilaaliyo dhammaan muddaha kama dambaysta ah. Sida ugu dhakhsaha badan ee suurtogalka ah raadso la-talin, gaar ahaan haddii:

- Muddaha kama dambaysta ah ay socdaan.
- Dukumentiyo kaa maqan yihiin.
- Aad qabto su'aalo ku saabsan habraaca codsiga.

Laanqayrta **Cas ee Awstariya (Österreichische Rote Kreuz)** waxay taageero ka bixisaa su'aalaha ku saabsan isku keenista qoyska, waxayna kaa caawisaa gudbinta codsiga:

T +43 1 589 00 – 789
fzf@roteskreuz.at

Xiriirrada xarumaha la-talinta ee gobollada federaalka ee kala duwan:
http://meinefamilie.roteskreuz.at/benefizientinnen/beratung/